

# Mudnaan Siinta Ku Dhaqanka xeerka ee Mashruuca Hormarinta Muhiimka ah (PDP)

Mashruucaaga waxaa loo aqoonsaday Mashruuca Hormarinta Muhiimka ah (PDP) ñ maxay tani ka dhigan tahay?

Ayadoo qayb ka ah mashruucaaga hormarinta waxaa lagaa doonayaa inaad soo dirto Qorshaha Maaraynta Tayada Biyaha Daadka ee PDP ga (SWQMP) si looga difaaco in wasaqdu gasho marinadeena biyaha kadib markay dhismaha kasoo baxdo. Hal qaab oo kaa caawinaaya buuxinta shuruudahaan waa inaad ku xirto **Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka ee Naqshada Dhismaha Wayn (SSD-BMPs)** goobtaada. Inaad ku darto SSD-BMP-yada ayaa ah qaab qiimo jaban oo looga ilaalinayo marinada biyaheena qashinka adiga oo raacaya raacaaya sharciga.

Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego ayaa abuuray tusmadana xogta si ay kaaga caawiso inaad fahanto dookhyadaada ku dhaqanka. Kala hadal tusmadaan qandaraasahaaga, injineerka dhismaha, ama farsamo yaqaanka dhul falida si loo go'aansho dookhyada ugu fiican ee mashruucaaga.

## Faa'iidooyinka SSD-BMP-yada

- Looma baahna inaad Heshiiska Dayactirka u hesho SSD-BMP-yada.
- Looma baahna saxiixa injineerka (hadda waxaa lagu ogol yahay Ruqsada Biyaha Daadka ee Maamulka magaalada ee 2013).
- Shuruudaha la Dhimay ee PDP SWQMP.

## Noocyada SSD-BMPs

Waxaa jira labo nooc oo SSD-BMP ah: Ceelasha geedka iyo aagaga Biyo Firdhinta.

### Ceelasha geedka


Ceelasha Geedaha ayaa daadka ku leexsha kadibna miira ciida ku wareegsan geedka meesha lagu beeray. Si guud, aaga ku u dhowdhow ceelka geedka ayaa ah mid taag ah (Sawirka 1) si biyaha loogu sahlo inay si dabiici ah u gasho gudaha, taasoo yaraynaysa xajmiga biyaha qulqulaaya ee galaaya nidaamka biyaha daadka. Waxaa badanaa laga sameeyaa aagaga ku teedsan meelaha lagu socdo, meelaha gaariyaashu ka baxaan, iyo aagaga baakinka si ay u qabtaan una daaweeyaa biyaha daadka.

### Agabka Naqshada ee Ceelasha geedka

- Xajmiga haynta ee loo baahan yahay ayaa lagu go'aanshaa xajmiga qabashada naqshada (DCV), nooca ciida goobta, iyo qotoda ciida ceelka geedka.
- Nooca sifaynta biyaha ee geedku bixinaayo ayaa ku salaysan balaca meesha iyo xajmiga ciida.

SAWIRKA 1

### Ceelka Geedka (Muuqaalka Guud)



**NOOCA CIIDA CEELASHA GEEDKA**  
Ugu yaraan 30" u jirta dusha ceelka ilaa salka hoose



## Aaga Biyo Firdhinta

Aaga biyo firdhinta waa meelo la beero oo loo sameeyay inay soo jiitaan ayna miiraan biyaha daadka ee ka yimaada meelaha sidibta ah sida saqafka dushiisa, meelaha lagu lugeeyo, iyo luuqada la maro. Daadka ayaa lagasoo duwaa meelahaan ayadoo la adeegsanaayo minjaroor nidaamka biyaha soo aruursha, ama af biyaha shuba (Sawirka 2), kaasoo biyaha daadka ku shuba aaga firdhinta. Halkaas, ayaa lagu miiraa ciida kadibna qashinka ayaa laga ilaaliyaa inuu galo nidaamka qaada biyaha daadka. Miirista ayaa sidoo kale yaraysa xajmiga biyaha daadka ee galaaya nidaamka biyaha daadka.

## Agabka Naqshada ee Goobaha Biyo Firdhinta


- Cabirka goobaha biyaha soo daynaaya marka loo eego aaga biyo firdhinta waa 1:1 ama ka yar.
- Biyaha daadka ayaa ku socda 10 fiid ama ka badan aaga aaga biyo firdhinta.
- 11 inji ee ugu koreeya ee ciida ayaa la badelaa.
- Taaga ayaa ka hooseeya 5%.



Biyo firdiyaha

S A W I R K A 2

### Aaga Biyo Firdhinta (Muuqaalka Dusha Sare)



## Si aad u heho Xog Dheeri ah

Booqo [www.sandiegocounty.gov/stormwater](http://www.sandiegocounty.gov/stormwater), GUJI “Development Resources (Ilaaha Hormarinta)”, kadibna hel faylalka la xariira SSD-BMP oo ku jira qaybta “Calculators and Modeling Software (Xisaabiyaasha iyo Softweerka Naqshada).”

Si aad u hesho tusaalaha Qorshaha Maaraynta Tayada Biyaha Daadka ee PDP, booqo [https://qrco.de/pdp\\_swqmp](https://qrco.de/pdp_swqmp) ama iskaanka mari koodhka QR.



waad ku mahadsan  
tahay samaynta  
qaybtaada si

loo ilaaliyo  
marinadeena biyaha

## Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir:

### Dhismaha PDS:

Su'aalo guud: 1-858-565-5920

Su'aalaha gaarka U ah Mashruuca: [daniel.pulido@sdcounty.ca.gov](mailto:daniel.pulido@sdcounty.ca.gov)  
ama [michael.casady@sdcounty.ca.gov](mailto:michael.casady@sdcounty.ca.gov)

Hormarinta Dhulka ee PDS: 1-858-694-2055

### Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha:

[BMP.Program@sdcounty.ca.gov](mailto:BMP.Program@sdcounty.ca.gov)